CPS

Ra'yi-celin & Cabashooyin



Somali

APRIL 2010

Ra’yi-celin & Cabashooyin

Sida ra’yi-celin ama cabasho loogu sameeyo Adeegga Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed

Abriil 2010

Ra’yi-celin iyo Siyaasadda Cabashooyinka - “*Kuusoo jawaabiddaada”*

Doorka iyo ujeeddada asalka ah ee Adeegga dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed (Crown Prosecution Service, CPS) waa in dambiilayaasha caddaalada la horkeeno, caawinta yaraynta fal-dambi iyo ka cabsi fal-dambi labadaba, kor-u-qaadid kalsoonida dadwaynaha ee isku maamulka sharciga, iyo caawinta dhibbanayaasha iyo marqaatiyaasha. Si aan taas u yeelno, waxaa naga go’an inaan bulshada aan u adeegayno siino heerka adeeg ugu sarreeya ee macquul ah.

Ujeeddada siyaasaddan
Waxaa naga go’an in aanu shaqsiyaadka ay si toos ah u saameeyaan adeegayaga siino fursad ay noogu sheegayaan in aan daboolnay heerarkii aanu dejisanay iyo in kale, iyo in aanu odhaahahooda uga jawaabno si dhaqso ah oo waxtar leh. Waxaan aqoonsanahay in dadwaynaha ay tahay inay ku kalsoonaadaan in la dhagaysanayo. Waan soo dhawayn doonaa oo baari doonaa wixii welwel ah ah ee laga yaabo inay qabaan, waxaanuna isku dayi doonaa inaan arrimaha sida u saxno sida ugu badan ee suurtogalka ah. Siyaasaddan waxay higsanaysaa waa xaqiijinta in cabashooyinka loogu hawlgalo si dareen leh, xaq ah, oo dhamaystiran, iyo in dhammaan ra’yi-celinaha (kuwa wanaagsan iyo kuwa xunba) si hagaagsan looga fiirsado waxna looga qabto.

Baaxadda siyaasadda
Siyaasaddan waxay qusaysaa cabashooyinka iyo ra’yi-celinaha kale. Waxaan ula dhaqmaynaa muujin kasta ee qanac la’aan ee ka timaada xubin dadwaynaha ah, kaasoo si toos ah adeegayagu u quseeyeen cabasho*. Waxaanu cabashooyinka ugu hawlgeli doonaa si waafaqsan qaabka hoos ku qoran.

*Cabasho waxaa samayn kara qofka ay qusayso ama matalahooda magacooda ku hadlaya, sida xubin qoyska ah, koox caawin ama qareen. Qoraal oggolaansho ah waa in la siiyaa qofka loo magacaabay inuu matalo qofka cabashada samaynaya oo ay matalaan danahooda.

Wixii ra’yi-celin ah ee la xidhiidha sida aan u hagaajin karno adeeggayaga waa la diiwaan geliyaa, waxaana loo isticmaali doonaa hagaajinta adeegga mustaqbalka.

Codsiyo sahlan oo macluumaad caadiyan loolama dhaqmayo sidii cabasho ama ra’yi-celin, waxayna ahaanaysaa mid dibadda ka ah siyaasaddan.

U sinnaanta helitaanka iyo macaamilka
Waxaan aqoonsanahay in haddii xubin ka mid ah dadwaynaha doonayso cabasho samayn, ama bixiso ra’yi-celin kale oo ku saabsan adeeggayaga ay annaga naga helaan, waa inay u arkaan mid fudud inay sidaas sameeyaan.

Waxaan higsanaynaa gaaritaanka tan annagoo marinayna qaab ku daabacaad macluumaadka ku saabsan siyaasaddayada iyo nidaamyadayada oo aanu ku daabacno boggayaga internet-ka, buug-yarayaal iyo macluumaad-sidayaal, iyo ku helitaan foomam qaab elektoroniik

ah iyo qaab waraaq ah, si loo diiwaan geliyo cabashooyin iyo ra'yi-celin. Waxaa naga go'an xaqiijinta in dhammaan isticmaalayaasha adeeggayaga ay si siman u heli karaan macluumaadkan iyo fursadda, markii ay suurtogal tahay, in loola xidhiidho qaabka ayaga ku haboon.

Cabashooyinka waxaa loola dhaqmayaa si dhexdhexaad ah oo kalsooni leh (waafaqsan waajibaadkayaga sharci). Waxaa sidoo kale loola dhaqmi doonaa si dareen leh, la aqoonsanayo baahiyaha shakhsiyeed. Hase yeeshee, waxaa diidi karnaa, , u hawgalka: cabashooyin rabshado leh; xariir-isgaarsiineed joogto ah; ama cabashooyin qaab-nidaameedkayaga cabashooyinka oo dhan soo maray.

La macaamilidda kuwa kale
Waxaan ka madax-bannaanahay booliiska in kasta oo si toos ah aan mar kasta ula shaqayno. Marka ay cabashadu u muuqato mid si toos ah ula xariirta booliiska ama hay'ad caddaaladda dambiyada oo kale waxaan bixin doonaa faahfaahinta halka lagu aadinayo cabashada noocaas ah. Haddii cabashadu la xariirto CPS iyo hay'ad kale, waxaan bixin doonaa jawaabta ugu waafisan ee aan awoodno, waxaanuna mar kasta ka fekeri doona in ay suurtagal tahay bixinta jawaab isku-duwan.

Barashada iyo hagaajinta
Cabashooyinka iyo ra'yi-celinta waxay mar kasta na siinayaan fursad aan wax ka badan uga baranayno adeegga aan bixino. Waan ururin doonaa oo lafaguri doonaa macluumaadka cabashooyinka iyo ra'yi-celinta aan helno ee heer degaan iyo heer qaran labadaba, si aan u wargelino siyaasadahayaga, u badalno nidaamyadayad una hagaajino qaab-shaqeedkayaga. Waan kormeeri doonaa xisaabina doonaa qaabka siyaasaddani u shaqayso. Waan daabici doonaa faahfaahinta hawl-qabadkayaga sannad kasta.

Nidaamka Wax-ka-qabashada Cabashooyinka ee CPS

Qaraar aan rasmi ahayn
Waxaan aqoonsanahay in inta badan xubnaha dadwaynaha ee aan ku qanacsanayn adeegga aan bixino ay doonayaan in qof uu eego dhibaatada sida ugu dhaqso badan. Sidaa darteed, tallaabada ugu horaysa ee cabasho waa la xariiridda xafiiska degaanka ama, haddii la garanayo, xubinta shaqaale ee wax ka qabatay arrinta. Sababta qancid la'aanta waxaa la awoodi karaa in si dhaqso ah loo xalliyo, waxaanuna higsanaynaa in aanu taa ku samayno anagoo sharaxaad bixinayna iyo, halkii ku haboon, raali gelin ama maxsuul kale oo la doonayo lana samayn karo.

Haddii aanan awoodin inaanu cabasho u xallino si dhaqso ah, waxaan wax uga qabanaynaa qaabka soo socda. Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in loo baahdo inaan waydiino macluumaad dheeraad ah si loo xaqiijiyo in cabashada si sax ah loo fahmay, loo baaray si dhamaystiran, iyo in la bixiyay jawaab waafi ah weji kasta ee nidaamka.

Wejiga 1
Cabashada waxaa si rasmi ah u diiwaan gelinaya dib-u-eegaya maareeye deegaan ee xafiiska halkaas oo dacwaddu ka soo jeeddo. Haddii cabashadu

ku saabsan tahay go'aan sharciyeed tan waxay ahaan doontaa maareeyaha qareen ee ku haboon.

Wejiga 2
Haddii cabashadu sii ahaato mid aan lagu qanacsanayn, wixii arrimo taagan dib-u-eegid ayaa waxaa ku samaynaya maareeye ka sareeya. Go'aamada sharciyeed, kani wuxuu caadiyan noqonayaa Madaxa Dacwad-ku qaadidda Maxkamadeed ee Degaanka ay qusayso ama Agaasimaha Xarumaha Guud ee ay qusayso. Go'aamada aan sharciga ahayn, tani waxay caadiyan ahaanaysaa Maareeyaha Hawlaha Degaanka ama Agaasimaha Xarumaha Guud ee ay qusayso. Waxay ku bixin doonaan jawaab dheeraad ah ee waqtiga loo qoondeeyay gudihiisa.

Wejiga 3
Ugu dambayn, cabashadii sii ahaata mid aan la xalin waa la gudbin karaa, iyadoo la marinayo Unugga Is-gaarsiinta ee Xarumaha Guud ee CPS, si uu uga fiirsado Agaasimaha Dacwad-ku qaadidda Dadwaynaha, Madaxa Hawl-fulinta, ama maareeye sare loo magacaabay inuu ayaga matalo. Waxaa laga doonayaa cabasho sameeyahay inuu habeeyo wixii arrimo taagan ah iyo uuna sharaxo sababta ay cabashadu ugu gudbayso dib-u-eegid dheeraad ah. Jawaabta celin wejigan la sameeyo waxay muujinaysaa dhammaadka nidaamka cabashooyinka ee rasmiga ah ee CPS.

Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
Haddii cabashadu ay sii ahaato mid aan lagu qancin qaabka ay ula tacaashay CPS, markaa dacwadda waxaa loo gudbin karaa Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare. Ujeeddada gudbintan ma ahan dib-u-eegidda wixii go'aamo sharciyeed ah, laakiin ujeeddadu waa xaqiijinta in ay CPS raacday nidaamka dacwadaha.

Fadkan ogsoonow in Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare uusan faragelinayn ilaa nidaamka cabashooyinka la soo gabagabeeyo.

Mudooyinka
Waan diiwaan gelin doonaa oo wargelin doonaa cabashooyinka weji kasta ee nidaamka rasmiga ah sida ugu dhaqso badan iyo, xaalad kasta, 3 maalmood oo shaqo gudahood ee marka aan helno cabashada. Waxaanu higsanaynaa in aanu bixino jawaab buuxda sida ugu dhaqso badan iyo xaalad kasta 20 maalmood oo shaqo gudahood. Markii cabashadu gaarto wejiga saddexaad ee nidaamka cabashooyinka waxaanu higsanaynaa in aanu jawaab ku bixino 40 maalmood oo shaqo gudahood. Waan u sheegi doonaa qofka cabashada samaynaya haddii aanan awoodin ku jawaabidda waqtiyadan gudahooda.

Cabashooyinka waa in sida ugu dhaqso badan loo sameeyaa iyo, xaalad kasta, 6 bilood gudahood ee arrinta cabashada laga samaynayo. Haddii dadka cabashada samaynaya aysan weli faraxsanayn ayna doonayaan inay u gudbiyaan cabashadooda wejiga xiga ee nidaamka waa inay sidan sameeyaan bil gudaheed ee jawaabta. Caadiyan waan diidi doonaa in aanu u hawlgalo cabasho lagu sameeyo waqti ka baxsan mudooyinkaas.